

2026-27

Codsiga Diiwaangelinta Furan

Gacaliye Waalid/Masuul,

Foomkan waa in lagu codsado isdiiwaangelinta hoos timaada Barnaamijka Xulashada Diiwaangelinta Gobolka oo dhan ama Diiwaangelinta Furan ([Xeerka Minnesota 124D.03](#)).

Si lagu tixgeliyo meelaynta, waa inaad sidoo kale buuxisaa Foomka Diiwaangelinta ee isku xirka hoose.

<https://www.slpschools.org/about/enrollment-center>

Tilmaamaha Codsiga

- Fadlan buuxi **Qaybta 1 kaliya** ee codsigan. Shaqaaluhu waxay dhamaystiri doonaan Qaybta 2.
- **Degmadda Deganaanshaha Ardayga** waa degmada dugsiga uu waalidka/masuulka ku nool yahay.
- **Goobta Dugsiga ama Dookhyada Barnaamijka** waa dugsiga aad rabto inaad dhigato degmadan.
- **Saxiixa Jirka ama Elektarooniga ah** ayaa loo baahan yahay, haddii kale codsigu waa mid aan sax ahayn.

Xulashada Soo Gudbinta

- Onlayn: Ku lifaaq Diiwaangelinta Furan ee PDF foomka diiwaangelinta onlaynka ah
- Iimayl: U dir PDF-ga Xarunta Diiwaangelinta ee ku taal enrollment@slpschools.org
- Qof ahaan: Xarunta Beesha Dhexe, Albaabka 1, 6300 Walker St, St. Louis Park, MN 55416
- Fiiro gaar ah: Waxaad soo gudbin kartaa foomkan ka dib wakhtiga kama dambaysta ah ee mudnaanta leh ee Janaayo 15.

Barnaamijka Kala-doorashada Sinnaanta ee Basaska (EOB).

Reer Minneapolis waxaa laga yaabaa in uu u qalmo gaadiidka laga soo qaado dugsiyada soo socda:

- Dugsiga Hoose ee Peter Hobart
- Dugsiga hoose ee Susan Lindgren
- Dugsiga Hoose ee Isbaanishka Immersion
- Dugsiga Dhexe ee St. Louis Park
- Dugsiga Sare ee St. Louis Park

Si aad ugu qalanto barnaamijka EOB, qoyskaagu waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

1. Waa inaad ku nooshahay Aagga Baska. Isticmaal xidhiidhka hoose si aad u baadho ciwaankaga
 - https://app.guidek12.com/stlouisparkmn/school_search/current/
2. Waa inaad buuxisaa Codsiga Faa'iidooyinka Waxbarashada oo aad u qalanto.
 - <https://www.slpschools.org/about/departments/school-nutrition>
3. Waa inaad buuxisaa arjiga Diiwaangelinta Furan oo lagu aqbalo.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad u baahan tahay caawimaad, fadlan nala soo xiriir.

Daacadnimo,

Shaqaalaha Xarunta Diiwaangelinta

Magaca Dambe ee Ardayga A-I: 952-928-6023

Magaca Dambe ee Ardayga J-Z: 952-928-6057

Arjiga Guud ee Xulashada Isdiiwaangelinta Gobolka oo Dhan ee K-12 iyo Waxbarashada Gaarka ah ee Hore.

Arjiga Guud ee Xulashada Isdiiwaangelinta Gobolka oo dhan ee K-12 iyo Waxbarashada Gaarka ah ee Hore waa arjiga looga baahan yahay dhamaan degmooyinka Minnesota. Fadlan u isticmaal arjigan isdiiwaangelinta furan ee degmooyinka u dhaxaysa ee K-12 iyo diiwaangelinta degmooyinka u dhaxaysa ee waxbarashada gaarka ah ee hore (ECSE). Fadlan isticmaal Arjiga Xulashada Isdiiwaangelinta Gobolka oo dhan ee Iskuulka Pre-Kindergarten ama School Readiness Plus ee ay Dawladu maalgeliso.

XUSUUSIN MUHIIM AH: Ha u sheegin macluumaad kale degmada aadan degenayn illaa iyo inta kursi lagugu siinayo qoraal ahaan. Waqtigaa, degmadu waxay codsan doontaa macluumaadka sida baahiyaha gaar ah, taariikhda dhalashada, jinsiyadda, jinsiga, qowmiyadda akadeemiyadda iyo diiwaanada kale.

Qaybta 1aad: Waa in uu buuxiyo hal ama labada waalid ama Mas'uullada ilmaha

Macluumaadka Ardayga

Magaca Dambe ee Ardayga: _____

Magaca Hore: _____

Magaca Dhexe oo Dhamaystiran: _____

Ardaygu miyuu ugu yaraan jiraa da'da 5 sano mana ka yaryahay da'da 21 sano Sebtembar 1 ee sanad-dugsiyeedka ama uu codsanayo ECSE?

Haa Maya*

* Haddii ay Maya tahay, fadlan akhri macluumaadka ku yaal [Tilmaamaha Xulashada Isdiiwaangelinta Gobolka oo dhan](#) kahor intaadan sii wadin.

Heerka fasalka hadda ee ardayga (Haddii aad codsanaysaan ECSE, qor EC): _____

Heerka Fasalka aad Rabtaan: _____

Macluumaadka Degmada Ardaygu Deganyahay

Magaca Degmada ilmuhu Degan yahay: _____

Lambarka Degmada: _____

Magaalada: _____

Degmada aad Dooratay (degmada dugsi ee aadan deganayn)

Magaca Degmada aad Dooratay: St. Louis Park Public Schools _____

Lambarka Degmada: 0283 _____

Magaalada: St. Louis Park _____

Sheeg sababta aad u codsanayso in lagugu qoro degmo aadan deganayn:

Doorbiditaanka Xarunta/goobta iyo Barnaamijka

Haddii degmada dugsiyeedka aadan deganayn ama degaankaaga ahayn) ay leeyahay xarumo/barnaamijyo badan oo u adeega baahida ilmahaaga, waxaad u tixi/qori kartaa goobaha/barnaamijyada sida aad u kala jeceshahay. (Ku dar doorbidyo dheeraad ah haddii aad rabto)

1. _____

2. _____

3. _____

Jadwalka Isqorista

Goorma ayaad raadineysaa inaad ilmahaaga diiwaangeliso?

- Isla hadda/wakhtigan
- Ma rabo isla wakhtigan, laakiin wakhti dhow inta lagu jiro sanad dugsiyeedka hadda
- Sanadka soo socda

Xaalado Gaar ah

Fadlan calaamadee dhammaan kuwa ku khuseeya.

- Doorbididda walaalaha: ardaygu wuxuu leeyahay walaal hadda diiwaangelin-furan kaga diiwaangashan degmada aanaan deganayn.
- Doorbididda caruurta shaqaalaha: ardaygu wuxuu leeyahay waalid ama mas'uulka sharciga ah ee degan Minnesota oo shaqaale ka ah degmada aanaan deganayn.

- Guuritaanka Qoyska: Degmada deganaanshaha ardayga ayaa isbedeshay Diseembar 1 ka hor intaan sanad dugsiyeedka la codsan, taas oo looga tanaasulayo xiliga kama dambaysta ah.
- Ardaygu wuxuu deggan yahay Magaalada Edina, laakiin degmada dugsi ee loogu talagalay guriga Edina ee ardaygu ma aha Edina Public Schools (Iskuulada Dadweynaha Edina). ardaygu wuxuu raadinayaa isqorista Dugsiyada Dadweynaha Edina.
- Ardaygu wuxuu codsanayaa in uu u guuro iyo/ama ka guuro degmo qaadata [Dakhliga Horumarinta iyo Isdhexgalka](#) oo cafinaysa/ka-dhaafaysa waqtiyada loo qabtay (deadlines). Waxaad halkan ka hubin kartaa haddii aadan ogeyn tan jawaabteeda:
- Ardayga hadda waa la eryey sida uu qabo Sharciga Minnesota, qayb-hoosaadka 121A.45 sababo ku qoran [Xeerk Minnesota, qeybta 124D.03, Qayb-hoosaadka 1, kaas](#) oo u oggolaanaya laakiin aan uga baahnayn degmada aan deegaanka ahayn in ay diido codsiga.

Macluumaadka Waalidka/Wakiilka Sharciga ah

Ardaygu waa inuu la noolyahay ugu yaraan hal waalid/mas'uul oo ku nool Minnesota.

Waalidka/Mas'uulka Minnesota 1

Magaca Dambe: _____

Magaca Hore: _____

Magaca Dhexe soo Gaabi: _____

Taleefanka Guriga: _____

Taleefanka Shaqada: _____

Taleefanka Gacanta: _____

Cinwaanka Waddada: _____

Magaalada: _____

Gobolka: _____

ZIP: _____

Waalidka/Mas'uulka 2:

Magaca Dambe: _____

Magaca Hore: _____

Magaca Dhexe soo Gaabi: _____

Taleefanka Guriga: _____

Taleefanka Shaqada: _____

Taleefanka Gacanta: _____

Cinwaanka Waddada: _____

Magaalada: _____

Gobolka: _____

ZIP: _____

Saxiixa Gacanta ee ugu yaraan Hal Waalid/Wakiil ayaa Loo Baahanyahay

Waxaan halkan ku xaqiijinayaa in macluumaadka kor ku qoran ay run iyo sax yihiin sida ugu fiicnayd aqoontayda.

Saxiixa Waalidka/Mas'uulka Sharciga ah ee 1: _____

Taariikhda: _____

Saxiixa Waalidka/Mas'uulka Sharciga ah ee 2 (ikhtiyaari): _____

Taariikhda: _____

Macluumaadka soo gudbinta

Si lagu siiyo tixgelinta mudnaanta leh, fadlan soo buuxi arjigan oo u dir Xafiiska Agaasimaha Guud ee [Degmada aadan deganeyn ugu danbayn](#) Janaayo 15 ka hor inta aan la gaarin diiwaangelinta koowaad ee guga (fall enrollment). Fadlan ha u dirin arjigan Waaxda Waxbarashada ee Minnesota. U isticmaal hal arji halkii ardayba degmo kasta oo aad codsanaysaan.

Arjiyada ay heshay degmada aadan deganayn 15-kii Janaayo ka dib ayaa laga yaabaa inay u qalmaan kuwa laga dhaafay waqtiga kama-dambeysta ah ama, haddii aysan ahayn, degmooyinku waxay si ikhtiyaari ah u ogolaan karaan inay diiwaangeliyaan iyada oo la adeegsanayo [Heshiiska Degmada Iskuulka aan Degaanka ahayn Diiwaangelinta u Dhaxaysa Degmooyinka](#).

Qeybta 2aad: Waa in ay Buuxiso Degmada aan degaanka ahayn

Degmada aan Deegaanka kuu ahayn: Ku ogeysii waalidiinta/mas'uulka ansaxinta codsiga ama diidmada qoraal ahaan **ugu danbayn Febraayo 15 ama aan ka badnayn 90 maalmood ka dib marka la helo codsiyada** soo maraya Barnaamijka Horumarinta iyo Isdhexgalka Iskuulada. Haddii aad diideen, waa inaad qoysaska ogaysiisaan sababaha sharciga ah ee diidmada. Codsiyada isdiiwaangelinta furan ee ECSE laguma diidi karo oo kaliya sabab ah in aan lahaynin awood lagu bixiyo adeegyada waxbarashada gaarka ah. (Fiiri Minn. Stat. § 124D.03, qayb-hoosaadka 6aad).

Fadlan soo dedeji wixii codsi ah ee isdiiwaangelinta furan ee Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee Hore.

Qoysasku waa inay aqbalaan ama diidaan siinta (offer) ugu danbayn Maarso 1 ama 45 maalmood ka dib ogeysiinta in arjigooda la ogolaaday. Marka ay hesho ballan qaadka dhigashada/kaqaybgalka, degmada aan deegaanka kuu ahayni waa in ay ku wargelisaa degmada deegaanka ah ugu danbayn bisha Maarso 15keeda (ama 30 maalmood kadib marka uu soo gaaro foomku haddii foomka la xareeyey Janaayo 15) ee ardayga doonaya inuu isdiiwaangaliyo. Degmooyinku waa in ay u soo sheegaan dhammaan codsiyada la diidey iyo sababaha Waaxda Waxbarashada ee Minnesota ugu danbayn Luulyo 15 ama sanad kasta.

Taariikhda Arjiga la Helay: _____

Magaca Degmada: St. Louis Park Public Schools _____

Lambarka Degmada: 0283 _____

Magaca Xiriirka Degmada: Andrea Ranzau _____

Darajada/Cinwaanka: Student Data Coordinator _____

Taleefanka: 952-928-6013 _____

Cinwaanka emailka: ranzau.andrea@slpschools.org _____

Kama dambaysta(deadline) Janaayo 15 miyay khuseysaa?

- Haa, waqtiga kama dambaysta ah ayaa la adeegsanayaa waana la buuxiyey.
- Haa, laakiin lama buuxin. **Haddii ay saas tahay, la xiriir xafiiska kormeeraha degmada ee degmada deganaanshaha isla markiiba wixii ku saabsan qaybta 3 ee foomkan** si loo go'aamiyo haddii degmada deganaanshaha iyo degmadaadu ay ku heshiinayaan **Non-resident Agreement (Heshiiska Degmada aan Deegaanka kuu ahayn)** si loogu adeego ardayga ka hor inta aan la bilaabin isdiiwaangelinta furan.
- Maya, mid ama labada degmoba waxay helaan maalgelinta Horumarinta iyo Isdhexgalka ee MDE.
- Maya, qoysku waxay u guureen degmada ay deganyihiin 1-da Diseembar ama ka dib.
- Maya, guddoomiyaha waxbarashada iyo guddoomiyaha xuquuqda aadanaha ayaa go'aamiyey in degmada deganaanshaha xeerarka degmada, nidaamyada ama ficilladoodu ay xad gudub ku yihiin Xeerka IV ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ([Minn. Stat. §124D.03, qayb-hoosaadka 7](#)).

Ardaygu miyuu mudnaanta ku helayaa bakhtiyaanasiib? Maya Haa, iyadoo ku saleysan:

- Ilmaha walaalaha ah ee hadda isdiiwaangelin-furan kaga diiwaangashan degmadan.
- Horumarinta iyo Isdhexgalka MDE-ansixiyay oo leh qorshe iskuul doorasho gaar ah oo ku lug leh degmooyinka.

- Ilmaha uu dhalay qof degan Minnesota oo shaqaale ka ah degmada.
- Qof degan magaalada Edina, oo degmo dugsiyeedka degaankoodu aysan ahayn Dugsiyada Dadweynaha Edina, oo doonaya inay soo galaan degmada.

Ogolaanshaha/Diidmada Arjiga Isdiiwaangelinta Furan

WAA LA AQBALAY

WAA LA ANSIXIYAY BALSE WAXAA LAGU ANSIXIYAY HESHIISHKA DEGMADA AAN DEEGAANKA KUU AHAYN sanadka bilowgiisa ee ay si wada jir ah ugu heshiiyeen labada dhinac. Diiwaangelintu waxay usii socon doontaa sanadaha soo socda sida diiwaangelinta furan marka laga reebo ardayda voluntary pre-kindergarten ama school readiness plus ee ku diiwaangashan heshiiska degmada aan degaanka kuu ahayn ee ardayda bilaabaysa kindergarten sanadka xiga kuwaas oo lagu meelayn karo habka diiwaangelinta bakhtiyaa-nasiibka ah hadduu jiro. (Degmada aan deegaanka kuu ahayn: hayso dukumeentiyada heshiiska. Degmooyinku waxay qori karaan heshiis iyagoo isticmaalaya Qeybta 3 ama qaab kale ee ay doortaan.)

GOOBTA /BARNAAMIJKA ARDAYGA LAGU QORAY

Iyada oo lagu salaynayo macluumaadka ku qoran codsiga kore, iyo marka la eego xeerarka iyo nidaamyada degmada, ardayga kor ku qoran ayaa lagu qoray:

Magaca Dhismaha Iskuulka: _____

Taariikhda ay Bilaabanayso: _____

Heerka Fasalka: _____

LAMA AQBALIN

Degmada aan deegaankaaga kuu ahayn ayaa diidey codsiga isqorista furan sababta oo ah sababaha soo socda ee loo ogolyahay Xeerarka Minnesota, Stat. § 124D.03. Xasuusin: Codsiyada isdiiwaangelinta furan ee ECSE looma diidi karo iyadoo lagu salaynayo mugga barnaamijka waxbarashada gaarka ah. Calamadee dhammaan kuwa ku khuseeya:

- Taariikhda ugu dambaysta ah ee 15-ka Janaayo lama waafaqin; xaaladaha laga yaabo inay ka dhaafi lahaayeen waqtiga kama dambaysta ahna ma jiraan. Eeg Tilmaamaha Xulashada Isdiiwaangelinta Gobolka oo dhan ama xeerarka Minnesota, Stat. § 124D.03, qayb-hoosaadka 3aad.
- Tirada/xaddidka diiwaangelinta sharciga ah ee isdiiwaangelinta furan ayaa la gaaray .([Minn. Stat. § 124D.03, Qayb-hoosaadka 2](#))
- Fasalku wuu xiranyahay degmada oo dhan amar ka yimid guddiga degmada oo dhan.([Minn. Stat. § 124D.03, qayb-hoosaadka 2aad iyo qayb-hoosaadka 6aad](#))

- Degmadu way diidey arjiga sababta oo ah sababo iskuul ka eryid la xiriira oo sharcigu ogolyahay. ([Minn. Stat. §124D.03, qayb-hoosaadka 1](#))

OGEYSIISKA KU SOCDA DEGMADA DEGANAASHAHA

Degmada aan degaanka kuu ahayn waa in ay ku wargeliso degmada degaanka ah ama degmadii ugu dambeysay ee uu dhigan jiray ugu danbayn Maarso 15 ama ugu danbayn 30 maalmood ka dib marka uu ardaygu rabo inuu isku qoro degmada aan deegaanka kuu ahayn. Isla nidaamkan ayaa lagu dabakhayaa ardaygii codsada inuu ka bedesho degmo aan deganaanshihiisa ahayn oo u bedesho degmo kale oo aan degaankiisa ahayn oo ka qayb-qaadanaysa u bedelashada degmo aan deegaanka kuu ahayn (non-resident district).

Magaca Agaasimaha Guud/Wakiilka Mas'uulka ah: _____

Saxiixa: _____

Taariikhda: _____

Fadlan Xusuusnow: degmooyinku waxba kama beddeli karaan foomkan, kuma dari karaan goobaha macluumaadka lagu qoro ama ma abuuri karaan foom qaabab kale ah.